IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho, 30 Maarso 1982, L. 3r3

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S.

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100

Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. balkii sadar iyo wasii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — kacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 8 ee 2 Maarso 1982, Ansixinta Sharciga Lamb. 60 ee 10ka Nofembei 1982. Bogga 217

SHARCI L. 9 ee 2 Maarso 1982, Oggolaansho Heshiis Amaaheed oo dhexmaray JDS iyo Keydka Horumarinta Afrika kuna saabsan amaah lacageedoo loogu talo galay Mashruuca Waraabinta Afgooye Moordinle (Qaybtiisa 2aad). » 218

SHARCI L. 10 ee 2 Maarso 1982, Heshiis Amaaheed oo dhexmaray JDS, iyo Sanduuqa Lacagta ee Carbeed, oo loogu tala galay in lagu daboolo caajiska Miisaaniyadda. » 219

Wakaaladda M. Qaranka

مرسوم رئيس الجمهورية رقم١٩٠٠٠ بتاريخ٢/٣/١٩٨١:
التصديق على اتفاقية قرض بين جمهورية الصومـــال ٣٢٦
الديمقراطية وصندوق النقد العربى الموقع بتاريخ٢٠/٨/
١٩٨١ والخاص بالمساهمة فى تمويل عجز كلى فى ميزان
مدفوعات ج.ص.د. عن العام المالى ١٩٨٠.

XEER MADAXWEYNAHA, JDS, L. 20 ee 1 Maarso 1982, Qadidda Xukunka deg degga oh. » 226

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 21 ee 2 Maarso 1982, Isku shaandheynta Golaha Was/da. » 227

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 22 ee 2 Maarso 1982, Billado Qalin oo Hawlka rnimo lagu Maamuusay J/yaasha ah Xildhibaan. » 232

QAYBTA SADDEXAAD

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.3.82, Lumid Buug Keyd L. 12508 ku qora Maxamed Cilmi Mooge L. 100 » 233

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15,3,82, Lumid Buug Keyd L. 777 ku Qoran Axmed Cali Maxamuud L. 101 » 234

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 15.3.82 Lumid Buug Keyd L, 1891 kuna qoran Saciid Caddib Caateeye L. 102 » 235

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 24.3.82 Lumid Jeeg War, L. 285162 ku qoran Maxamed Axmed Faarax L. 103/bis » 236

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 19.10.81 Lumid Buug Keyd L. 19091 ku qoran Maxamed Cumar Sh. Muxyidiin L. 104 » 237

QAYBTA LABAAD

SHARCI L. 11 ee 2 Maarso 1982, Heshiis Amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Lacagta ee Carbeed, laguna tala galay in lagu dheelitiro Waxbixinta Lacagaha Qalaad. » 220

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 17 ee 2 Maarso 1982, Meelmarin Heshiis Amaaheed dhexmaray JDS, iyo Keydka Horumarinta Afrika, kuna saabsan amaah Lacageed oo loogu talo galay Mashruuca Waraabka Afgooye Moordinle (Qaybtiisa 2aad). » 221

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٧٠٠، بتاريخ ١٩٨٢/٣/٢: التصديق على اتفاقية قرض بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وصندوق التنمية الافريقى من أجل تمويل التكاليف بالعملات الاجنبية من مشروع أفجوى — موردينلى (المرحلة الثانية) . ٢٢٢

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 18 ee 2 Maarso 1982, Meelmarin Heshiis Amaaheed dhexmaray JDS, iyo Sanduuqa Lacagta Carbeed, loogu talo galay in lagu daboolo Caajiska Miisaaniyadeed » 223

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٨٠٠٠ بتاريخ ١٩٨٢/٣/٢: التصديق على اتفاقية قرض بين جمهورية الصومال الديمقراطية وصندوق النقد العربى ، المبرم بتاريخ ١٩٨١/٨/٢٠، والخاص بالمساهمة فى تمويل العجز فى ميزان المدفوعات . ٢٢٤

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 19 ee 2 Maarso 1982, Meelmarin Heshiis Amaaheed dhexmaray JDS, iyo Sanduuqa Lacagta Carbeed, loogu talo galay in lagu dheelitiro Cajsiga Miisaaniyadda lana kala saxiixday 20.8.81 » 225

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI Lambar 8 taariikh 2 Mar. 1982. Ansaxinta Sharciga Lambar 60 ee 10ka Nofember 1981.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

(Baabi'in)

Waxaa la Ansixiyey Sharciga Lambar 60 ee Noofember 1981, kuna saabsan U ROGID SHARCI X r Sharci Lambr 60 30ka Oktoobar 1981, wax ku keenida habka Franka Faluta, qodobbada kala ah 1aad, 2aad 3aad, 5aad, iyo 6aad ee Xeer Sharcigaas.

Qod. 2aad

(Baabi'in)

Waxaa la baabi'iyey qodobka 4aad ee Xeer Sharciga kor ku tilmaaman oo u qoran sida soo socota:

«Wixii aan duruuri ahayn (nin essential itemes) oo Bankiga Dhexe u furi waayo ictimaad (L/C), Wasiirka Wasaaradda iyo kan Ganacsigu, kadib markey dersaan, awood ayay u leeyihiin in ay fasaxaan in Franka Faluta lagu keeno».

Qod. 3aad

(Dhaqangal)

Ansixintaan waxay dhaqan geleysaa laga billaabo 4 Jennaayo 1982, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Mar. 1982.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Jaalle Maramed Siyaad Barre)

SHARCI Lar 9 2 Mar. 1982 Oggolaansh Heshiis Amaaheed oo Dhexmaray JDS, iyo Keydka Horumarinta Afrika kuna saabsan Amaah Lacageed oo loogu talo talo galay Mashruuca Waraabka Afgooye Moordiile (Qaybtiisa 2aad).

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Heshiiska dhexmaray J.D.S. iyo Keydka Horumarinta Afrika, kuna saabsan amaah Lacageed co dhan (H.X.8.090.000) oo loogu talo galay Mashruuca Waraabka Afgooye Moordiinle (Qaybtiisa 2aad).
2. Heshiiska waxaa la kala saxiixday markey taariikhdu ahayd 9.12.1981.
3. Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan Sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyey inuu meel mariyo Heshiiska Sharcigan lagu tilmaamay.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 2.3.1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI Lambar 10 taariikh 2 Mar. 1982 Heshiis Amaaheed oo dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Lacageed ee Carbeed, oo loogu tala galay in lagu daboolo cajiska Miisaaniyadda.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Galaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Meel marinta Heshiiska dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Lacagta Carbeed kuna saabsan amaaha lacageed oo dhan 12.740.000 Diinaar Xisaabeedka Carbeed, looguna tala galay in lagu daboolo Caajis Miisaaniyeed oo culus, ka na yimid khalal qaabka Guud ee dhaqaale.—
2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Abu dabi Dawladda Imaaraadka Carabta, taarikh markay ahayd 20.8.1981.
3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan qodobada Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigaan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan Sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraatiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Heshiiska Sharcigan lagu tilmaamay.—

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Mar. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCILambar 11 taariikh 2 Mar. 1982 Heshiis Amaa heed ee dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Lacagta ee Carbeed, looguna talo galay in lagu dheelitiro Warbixinta lacagaha qalaad.

MADAXTOOYADA

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Meel marinta Heshiiska dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Lacagta Carbeed, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan 1.440.000 Diinaar Xisaabeedka Carbeed, si loogu meeleeyo dheeli Guud ee ku yimid dheelitirka Waxbixinta lacagaha qalaad, sanadka maaliyeedka 1980.
2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Abu dabi, Dawladda Imaaraadka Carabta, taarii khdu markay ahayd 20.8.1981.
3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lifaaq ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan qodobada Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan wax ay leeyihiin qiimo iyo astaan Sharci la heer ah Sharci yada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad.

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey inuu Meel mariyo Heshiiska Sharcigagaan lagu tilmaamay.

Qod. 4aad.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Mar. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. Lambar 17 ee 2 Mar, 1982

Meelmarinta Heshiis Amaaheed Dhex Maray JDS iyo Keydka Horumarinta Afrika, kuna saabsan Amaah Lacageed oo loogu talo galay Mashruuca Waraabka Afgooye Moordiinle (Qaqbtiisa 2aad).

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka, xubintiisa 4aad.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lamb. ee 2.3.1982 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska kor ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel mariyo.

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad.

Waxaa la meel mariyey Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Keydka Horumarinta Afrika, kuna saabsan Amaah Lacageed oo loogu talo galay Mashruuca Waraabka Afgooye Moordiinle (Qaybtiisa 2aad).

Qod. 2aad.

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan Sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado Warqadaha meel marinta.

Qod. 3aad.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqodraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 2.3.1982

MADAXWEYNAHA J.D.S,

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٧٠٠٠٠ ، بتاريخ ١٩٨٢/٣/٢ :
التصديق على اتفاقية قرض بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وصندوق التنمية الافريقى من أجل تمويل التكاليف بالعملات الاجنبية من مشروع رى أفقوى — موردينلى (المرحلة الثانية) .

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفترة الرابعة من المادة ٨٢ من الدستور .

وعلى القانون رقم بتاريخ ١٩٨٢/٣/٢ والذى بموجبه وافق مجلس الشعب على الاتفاقية السالفة الذكر .

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية المذكورة أعلاه .

يرسم

بما هو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وصندوق التنمية الافريقى من أجل تمويل التكاليف بالعملات الاجنبية من مشروع أفقوى — موردينلى (المرحلة الثانية) والمبرم بتاريخ ١٢/٩/ ١٩٨١م .

المادة الثانية

للاتفاقية قوة القانون فى جمهورية الصومال الديمقراطية ويعمل بها اعتارا من تاريخ تبادل وثائق التصديق .

المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم اعتبارا من تاريخ نشره فى الجريدة الرسمية للجمهورية . مقديشو ، فى ١٩٨٢/٣/٢م .

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

(محمد سياد برى)

XEERKA MADAXWEYNAHA J.D.S. Lambar 18 2 Mar 1982 M lmarinta Heshiis Amaaheed dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Lacagta Carbeed, Looguna talo Galay in lagu Daboolo Cajsiga Miisaaniyadeed la na kala saxiixday 20.8.1981.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU AHKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka, xubin tiisa 4aad.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar ee 2.3.1982 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska kor ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel mariyo.

Qod. 1aad.

Waxaa la meel mariyey Heshiiska dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Lacagta Carbeed oo loogu talo galay ca jis Miisaaniyadeed oo culus, kana yimid khalal qaabka Guud ee dhaqaalaha, heshiiskaasoo la kala saxiixday taariikhdu markey ahayd 20.8.1981:

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan Sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado Warqadaha maal marinta.

Qod. 3aad.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxii xo Madaxweynaha J.D.S: Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Mar. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٨٠٠٠٠ بتاريخ ١٩٨٢/٣/٢ :
التصديق على اتفاقية قرض بين جمهورية الصومال الديمقراطية وصندوق النقد العربى ، المبرم بتاريخ ١٩٨١/٨/٢٠ ، والخاص بالمساهمة فى تمويل العجز فى ميزان المدفوعات .

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الرابعة من المادة ٨٢ من الدستور .

وعلى القانون رقم بتاريخ ١٩٨٢/٣/٢ والذى بموجبه وافق مجلس الشعب على الاتفاقية السالفة الذكر .

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية المذكورة أعلاه .

يرسم

بما هو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض بين جمهورية الصومال الديمقراطية وصندوق النقد العربى ، الخاص بقرض ممتد للمساهمة فى تمويل عجز ميزان المدفوعات الناجم عن خلل هيكلى فى الاقتصاد، والمبرم، بتاريخ ١٩٨١/٨/٢٠م.

المادة الثانية

للاتفاقية قوة القانون فى جمهورية الصومال الديقراطية ويعمل بها اعتبارا من تاريخ تبادل وثائق التصديق .

المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية ، وينشر فى الجريدة الرسمية .

مقديشو ، فى ١٩٨٢/٣/٢م

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

XEERKA MADAXWEYNAHA J.D.S. Lamb. 19 2 Mar, 1982 Meelmarinta Heshiiska Amaaheed Dhexma ray J.D.S: iyo Sanduuqa Lacagta Carbeed, loogu na talo galay in lagu dheelli tiro Cajisiga Miisaa niyadda Lacagta Qalaad.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka, xubin tiisa 4aad.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lamb. ee 2.3.1082 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday meel marinta He shiiska kor ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel mariyo.

WUXUU XEERIYEC

Qod. 1aad.

Waxaa la meel mariyey Heshiiska Amaaheed ee dhex maray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaali ya iyo Sanduuqa Lacagta Carbeed, oo lagu kala saxii xday magaalada Abuu Dabay taariikhdu markey aha yd 20.8.1981, looguna talo galay dheellitirka Miisaani yadda Lacagta Qalaad ee Sannad Maaliyadeedka 1980

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa J.D.S. Astaan Sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa marka la is dhaa fsado Warqadaha meel marinta.

Qod. 3aad.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J:D.S. waxaana lagu soo soorayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2,3,1982

MADAXWEYNAHA J,D,S,
(Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٩٠٠٠ بتاريخ ١٩٨٢/٣/٢:
التصديق على اتفاقية قرض تلقائى بين جمهورية الصومال الديمقراطية وصندوق النقد العربى ، الموقع بتاريخ ١٩٨١/٨/٢٠ والخاص بالمساهمة فى تمويل عجز كلى فى ميزان مدفوعات ج.ص.د. عن العام المالى ١٩٨٠.

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الرابعة من المادة ٨٢ من الدستور.

وعلى القانون رقم بتاريخ ١٩٨٢/٣/٢ والذى بموجبه وافق مجلس الشعب على الاتفاقية السالفة الذكر .

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية أعلاه .

يرسم

بما هو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض التلقائى بين جمهورية الصومال الديمقراطية وصندوق النقد العربى ، المواقع بتاريخ ١٩٨١/٨/٢٠م، والخاص بالمساهمة فى تمويل عجز فى ميزان مدفوعات جمهورية الصومال الديمقراطية عن العام المالى ١٩٨٠ .

المادة الثانية

للاتفاقية قوة القانون فى جمهورية الصومال الديمقراطية ويعمل بها اعتبارا من تاريخ تبادل وثائق التصديق .

المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية وينشر فى الجريدة الرسمية .

مقديشو ، فى ١٩٨٢/٣/٢م .

MADAXWEYNAHA JDS Lam, 20 Taariikh 1 Mar, 1982
Qaadidda Xukunka Deg dega ah,

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 83aad ee Dastuurka ee sii naya Madaxweynaha JDS inuu Xukun Deg deg ah ku soo rogo Dalka, marka ay jiraan arrimo khatar gelinaya Qarannimada iyo Nabadgelyada Gudaha ama Dibadda ee Dalka, ama markasta oo ay jirto baahi lagama maarmaan ah.

MARKUU ARKAY: In ay dhammaatay xaaladdii ke-entay soo rogidda Xukunka Deg dega ah

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad.

Waxaa la qaaday Xukunka Deg dega ah ee lagu soo rogay Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soo maaliya, Laguna Jideeyey Amarka Madaxweynaha JDS Lamb. 1 ee 21ka Oktoobad 1980.

Qod. 2aad

Laga billaabo taariikhda Xeerkan, Xubnaha Gola ha Sare ee Kacaanku waxay ku noqonayaan hawlahoo dii caadiga ahaa.

Qod. 3aad.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saara yaa Faafinta Rasmiga ah Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1 Mar. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S,
(Maxamed Siyaad Barre)

XEERKA Madaxweynaha JDS Lamb. 21 taariikh 1 Mar. 1982 Isku shaandheynta Golaha Wasiirrada

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad, Faqradda 7aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Qod. 86aad Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Qod. 92aad ee Dastuurka.

MARKUU TIXGELIYEY: Sharciga Lamb. 14 ee 1962 kuna Saabsan Nidaamka Dawladda iyo beddelaa dyadii ka dambeysay.

MARKUU ARKAY: In ay lagama maarmaan tahay in la isku shaandheeyo Xubnaha Golaha Wasiir rada, lana magacaabo Wasiirro iyo Wasiirro Ku xigeenno cusub.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad.

Xildhibaannada soo socda waxaa loo magacaabay Xilka mid kasta magaciisa ku hor qoran:

1. Jaalle S/Guud Maxamed Cali Samatar, Wasxrka Wasaaradda Gaashndhigga.
2. Jaalle S/Gaas Xuseen Kulmiye Afrax, Kaaliyaha Madaxweynaha Arrimaha Dawladda.
3. Jaalle S/Gaas Cabdalla Maxamed Faadil, Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.
4. Jaalle S/Guuto Axmed Suleymaan Cabdalla, Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta.
5. Jaalle G/Sare Axmed Maxamuud Faarax, Wasiirka Wasaaradda Macdinta iyo Horumarinta Biyaha.
6. Jaalle G/Sare Cabdi Warsame Isaaq, Wasiirka Wasaaradda Shaqda iyo Arrimaha Bulshada.

7. Jaalle G/Sare Maxamed Cumar Jees,
Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hannuuninta Dadweynaha.

8. Jaalle G/Sare Axmed Xasan Muuse,
Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud.

9. Jaalle G/Sare Muuse Rabiile Good·
Wasiirka Wasaaradda Madaxtooyadda.

10. Jaalle S/Gaas Yuusuf Axmed Salxaan,
Wasiirka Wasaaradda Dalxiiska.

11. Jaalle Dr. Cabdullaahi Axmed Caddow.
Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

12. Jaalle S/Guuto Bile Rafle Guuleed,
Wasiirka Wasaaradda Beeraha.

13. Jaalle Inj. Cusmaan Jaamac Cali,
Wasiirka Wasaaradda Kalluunka.

14. Jaalle Dr. Cabdiraxmaan Cabdulle Cusmaan,
Wariirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

15. Jaalle Dr. Cabdiraxmaan Jaamac Barre,
Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

16. Jaalle Dr. Cabdullaahi Cosoble Siyaad,
Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta·

17. Jaalle S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib,
Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka

18. Jaalle Dr. Axmed Shire Maxamuud,
Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

19. Jaalle Cabdiqaasim Salaad Xasan,
Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

20. Jaalle Dr. Maxamed Cali Nuur,
Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa.

21. Jaalle S/Gaas Cumar Xaaji Maxamed,
Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka.

22. Jaalle Dr. Cabdisalaan Sheekh Xuseen,
Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda.

23. Jaalle Dr. Maxamed Cumar Jaamac,
Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga.

24. Jaalle Axmed Jaamac Cabdulle,
Wasiirka Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga.

25. Jaalle G/Sare Mire Awaare Jaamac,
Wasiirka Wasaaradda Dhallinyarada & Isbortiga.

26. Jaalle Dr. Axmed Xabiib Axmed,
Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Dhaqaalaha Dooxada Juba.

27. Jaalle S/Guuto Axmed Sahal Cali,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Gaashaandhigga.

28. Jaalle Maxamed Cabdi Yuusuf,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka.

29. Jaalle Dr. Maxamuud Cabdi Nuur,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Beeraha.

30. Jaalle Cali Saalax Cabdikariim,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

31. Jaalle Cali Xuseen Cabdullaahi,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Ganacsiga.

32. Jaalle Maxamed Sheekh Mursal,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Boosaha iyi Isgaarsiinta.

33. Jaalle Saleebaan Maxamed Aadan,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

34. Jaalle Maxamed Faarax Ciise,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Maaliyadda.

35. Jaalle Maxamed Nuur Caliyow,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Warshadaha.

36. Jaalle Dr. Khaliif Muuse Samantar,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hannuuninta Dadweynaha.

37. Jaalle Dr. Faaduma Axmed Caalin,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

38. Jaalle Dr. Daahir Warsame Yuusuf,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

39. Jaalle Maxamed Yuusuf Axmed,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

40. Jaalle Jaamac Gaas Macaawiye,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha.

41. Jaalle Dr. Maxamuud Saciid Maxamed,
Wasiir Kuxigeenk aWasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

42. Jaalle Shire Suudi Maxamuud,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Kalluunka.

43. Jaalle Maxamed Xaaji Axmed,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Macdanta iyo Horumarinta Biyaha.

44. Jaalle Dr. Cabdirashiid Sheekh Axmed,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Caafimaadka.

45. Jaalle Xasan Suudi Xirsi,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga.

46. Jaalle Dr. Maxamed Cali Xaamid,
Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Arrimaha Di/da.

47. Jaalle Cumar Maxamed Xandulle, Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Horumarinta Dhaqaalha Dooxada (Juba).

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa durbadiiba, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.3.1982

MADAXWEYNAHA J,D,S,

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHAJDS L. 22 ee 2.3,1982
Billado Qalin oo Hawlkarnimo lagu maamusay Jaallayaasha Xildhibaan Axmed Sugulle Xirsi iyo Xildhibaan Axmed Maxamed Isaaq

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qo/ka 82aad ee Dastuurka JDS

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 65 ee 19ka Oktoobar 1970

MARKUU TIXGELIYEY: Hawlkarnimada Jaallayaasha Axmed Sugulle Xirsi iyo Axmed Maxamed Isaaq «Karakuus», Shaqadii adkayd ee ay ka soo qabteen Gobboladii ay Xukumi Jireen iyo halgankoodi dheeraa oo ay ku qabanayeen hawlaha Wad danka ilaa maantana ku sii wada.

MARKUU TIXGELIYAY: In lagama maarmaan tahay in Jaallayaashaa oo si hagar la'aanta u soo gutay waajibaadkooda xagga shaqada, la guddoonsiiyo aqoonsiga Kacaankooda iyo Ummadoodaba ay ka mudan yihiin, looguna reebo raad wax ku ool ah.

WUXUU SOO SAARAY:

Xeerka Soo Socda:

Qodob keliya

Waxaa lagu maamusay Billad Qalin oo Hawlkarnimo ah Jaallayaasha kala ah.

1) Xildhibaan Axmed Sugulle Xirsi iyo Xildhibaan Axmed Maxamed Isaaq.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu soo saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho, 2.3.1982

L. 22

MADAXWEYNAHA J,D,S,
(Maxamed Siyaad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd Dhumay oo Lamb. ahaa 12508 Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad kuna Qoran Lauag dhan Sh. So. 2.000 uu iska lahaa Maxamed Cilmi Mooge Xirsi sida ku cad Warqadda Lambarkeedu 00400 Taariikhdeedu 3.3.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la Baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 12508 oo ku qoran Jaalle Maxamed Cilmi Mooge Xirsi ayna ku jirto Sh. So. 2.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Saddexaad u bedelo Maxamed Cilmi Mooge Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah kadib markey ka sco Wareegato muddo aan ka yareeyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah la ga Keenin.

Muqdisho, 13.3.82

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR.

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 101

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd Dhumay oo Lamb· ahaa 777. lagana soo saaray Bangiga Ganac siga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir ku na Qoran Lacg dhan Sh. So. 1800 uu iska lahaa Ax med Cali Maxamed Maxaad sida ku cad Warqadda Lambarkeedu Taariikh 15.3.82 ee Bankiga Ganacsi ga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam· 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la Baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 777 oo ku qoran Axmed Cali Maxamuud Maxaad ayna ku jirto Sh. So. 1800

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Wadajir u bedelo Axmed Cali Maxamuud Maxaad Buugga Keyd. ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah kadib markey ka soo wareegato muddo aan ka yareeyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu Daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaa liya, Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.3·82

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR·

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 101

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd Dhumay oo Lamb. ahaa 1891 Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad kuna Qoran Lacag dhan Sh. So. 44.310 uu iska lahaa Sa ciid Caddib Gaateye Sida ku cad Warqadda Lamb. 00435 Taariikhdeedu 18.3.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la Baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 1891 oo ku qoran Saciid Caddib Caateye ayna ku jirto Sh. So. 44.310.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Sadde xaad u bedelo Saciid Caddib Caateye Buug Keyd ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah kadib markey ka soo wareegato muddo aan ka yareeyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu Daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.3.82

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR.

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 102

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU XAQIIQSADAY: Inuu Dhumay Jeegga Wareega Lambarkiisu ahaa 285162 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran Lacag dhan Sh. So. 20.000 uu iska lahaa Maxamed Axmed Faarax sida ku cad Warqadda Lambarkeedu 002031 Taariikhdeedu 18.3.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la Qiimetiro (Amortamente) Jeegga Wareega Lamb. 285162 oo ku qoran magaca Maxamed Axmed Faarax ayna ku jirto Sh. So. 20.000.

WUXUU FASAXAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco in uu siiyo Maxamed Axmed Faarax Lacagta ku qoran Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman kadib markey ka soo Wareegato muddo aan ka yareyn 15 Beri marka Go'aankaan lagu Daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

WAXAA LA AMRAAYAA

In Go'aan lagu Daabauo Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Lana Gaar siiyo Laanta Burco ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed.

Muqdisho, 24.3.82

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR.

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 103/bis

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd Dhumay oo Lamb. anaa 19091 Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qo ran Lacg dhan Sh. So. 1.125/= uu iska lahaa Maxamed Cumar Sh. Muxyidiin sida ku qoran Warqadda Lamb. 02509 taariikh 11.10.81. ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lamb. 2.9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la Baabi'iyo (Amortamento) Buuga Keydka Lam. 19091 oo ku qoran magaca Cumar Sh, Muxyidiin ayna ku jirto Sh. So. 1.125/=

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u bedelo Maxamed Cumar Sh. Muxydiin, Bugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, had dii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho,

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 104

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDIU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo Lamb. ahaa 9465 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad kuna Qoran Lacag dhan Sh. So. 10.020 uu iska lahaa Xaawo Cabdi Maxamed sida ku cad Warqarda Lambarkeedu 00445 taariikhdeedu 20.3.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 9465 oo ku qoran Jaalle Xaawo Cabdi Maxmed ayna ku jirto Sh. So. 10.020/=.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Saddexaad u beddelo Jaalle Xaawo Cabdi Maxamed Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.3.82

GUDDOOMIYAHA MAX. G. BANAADIR
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)